

Maxay Dawlad Goboleedku kharaj ugu bixisaa barnaamijyada kiindaha?

Cilmi baaris ayaa muujisay in barashada hore asaas u samayso waxbarashada mustaqbilka, barnaamijka kiindaha oo tayada lihina wanaajiyo barashada dambe, caafimaadka iyo dabeecada, saamayn suubana ku yeesho nolosha dambe.

Dawlada Fiktooriya waxay kharaj ku bixisaa adeegyo badan si ay u bixiso barnaamij kiinde si loo caawimo barashada aadka loogu baahan yahay sanadaha hore kuwaas oo:

- asaas u dhiga barashada dambe
- u sameeya carruurta dhabada lagu gaaro guusha waxbarashada, shaqada iyo nolosha dambe.

Wixii ku dhaca carruurtaada sanadaha hore waxay saamaysaa sida maskaxdoodu u korto.

Maxaa ilmahaygu baran doonaa?

Waaya-aragnimada kiinduhu waxay siisaa ilmahaaga fursada:

- yeelashada xirfada wada-hadalka iyo xirfadaha caawima akhrinta iyo qoritaanka
- yeelashada masuuliyada iyo madaxbanaanida, helida kalsoonida iyo dareemida wax ahaanta
- barashada xirfadaha bulsho sida dhegaysiga iyo ixtiraamida fikrada dadka kaleeto
- dhisida isu-warhaynta iyo ixtiraamida kuwa kale
- barashada hal-abuurka
- xisaab samaynta, barashada bulshada iyo sayniska
- isticmaalida tiknoolojiga
- iqtiraaxida faraxa iyo barashada
- yeelashada saaxiibo cusub.

Sidee ku hellaa barnaamijka kiindaha?

Barnaamijka kiindaha waxaa lagu bixin karaa meella kala duwan, sida kiindayaasha bulshada, xarumaha daryeelka ilmaha iyo dugsiyada qaarkood.

Si loo hello barnaamij kiinde oo taya leh oo agtaada ku yaal eeg www.education.vic.gov.au/findakindergarten ama la xiriir golaha degmada.

Meelaha lagala xiriirayo golaha agtaada ah waxaa laga helli karaa websaytyada www.mav.asn.au ama www.vicnet.net.au/government/localgovt

Waxaad kaloo booqan kartaa websaytka www.education.vic.gov.au/earlychildhood ama wac Xafiiska Carruurta iyo Horumarka Ilmanimada Hore tel: 1300 731 947 (qiimaha halkaad joogto).

- 1800 890 400 Amharic - የአማርኛ አስተርጓሚ አገልግሎት (የላ የስልክ ባገደ)
- 1800 890 401 Arabic - للحصول على خدمات مترجم عربي (مكالمة مجانية)
- 1800 890 403 Cambodian - ជំនួយក្នុងការបកប្រែភាសាខ្មែរ (ទូរស័ព្ទឥតគិតថ្លៃ)
- 1800 890 404 Cantonese - 可獲得廣東話傳譯服務 (免費電話)
- 1800 890 402 Dinka - T̪ɛ̃n̪ɛ̃ Agamthok ɛ̃ Muɔ̃nj̪än̪ (K̪ɛ̃n̪ɛ̃ ee Talapun Cie Yup ɛ̃ W̪ɛ̃u)
- 1800 890 406 Filipino - Para sa serbisyong pang- interprete sa wikang Pilipino (libreng tawag)
- 1800 890 405 Korean - 한국어 통역을 원하시면 (무료 통화)
- 1800 890 409 Macedonian - За преведувачи на македонски (бесплатен повик)
- 1800 890 407 Mandarin - 普通话传译员 (免费电话)
- 1800 890 408 Nuer - Ni loorä baaj a thil yiw (Free call)
- 1800 890 410 Russian - Русская переводческая служба (бесплатный звонок)
- 1800 890 411 Serbian - За Службу тумача на српском (бесплатан позив)
- 1800 890 412 Somali - Adeega mutarjumka ee Soomaalida (lacag la'aan)
- 1800 890 413 Spanish - Para Servicio de intérpretes en castellano (llamada gratuita)
- 1800 890 414 Turkish - Türkçe sözlü tercümanlık hizmeti için (ücretsiz arama)
- 1800 890 415 Vietnamese - Dịch vụ thông ngôn bằng tiếng Việt (điện thoại miễn phí)

Kiinde (Kindergarten) lacag la'aana ama qiimihiisu hooseeyo

Kabida kharajka kiindaha (kindergarten)



Waxaa laga yaabaa in ilmahaagu xaq u leeyahay kiindaha (kindergarten) lacag la'aana ama qiimihiisu hooseeyo taas oo qayb ka ah ballanqaadka joogtada ah ee Dawlada Fiktooriya oo waxbarashada tayaysan ee ilmanimada hore.

Ilmahaaga ama adigu ma haysataan kaararkaan ama fiisooyinkaan?

Waad dalban kartaa kharaj dhimida haddii aad haysato kuwaan midkood:

- Kaarka Daryeelka Caafimaadka (Health Care Card)
- Kaarka Dhimista Hawlgabka (Pensioner Concession Card)
- Kaarka dahabiga ah ee Wasaarada Dadka Shaqada ka Fariistay (Department of Veteran's Affairs Gold Card)
- Fiisooyinka Nabadgelyaynta/Aadamiga oo kala ah 447, 451, 785 iyo 786
- Fiisooyinka Magangeladoonka ee A-F (Bridging Visas A-F)
- Fiisooyinka Khaaska ah ee Aadamiga iyo Qaxootiga ee 200-217

Haddii aad haysato saddex ama afar carruura oo isku mar dhashay oo isla sanad tegaya kindergarte-ka waxaad xaq u leedahay in lagaa kabo ilma walba.



Kiinda lacag la'aan ama qiimihiisu hooseeyo

Waxaad awoodaa inaad hesho kiinde lacag la'aana (ama kiinde qiimihiisu hooseeyo) haddii aad haysato kaararkan lacag dhimista mid kood ama fiisooyinkaas ama carruur saddex ama afar ah oo isku mar dhalatay.

Taas waxaa sabab u ah Dawlada Fiktooriya ayaa ku bixisa kharaj dhan 10 saacadood barnaamijka kiindaha asbuucii. (Haddii barnaamijka kiinduhu ka badan yahay 10 saacadood asbuucii, waxaa laga yaabaa inaad hesho saacado siyaada ah oo lacag la'aana, ama waxaa laga yaabaa inaad bixiso saacadaha siyaadada ah keliya).

Sidee ku heli karaa kharajka kabista ee kiindaha?

La hadal shaqaalaha tusna kaarka dhimista, fiisada, shahaadada dhalashada ama dukuminti la ansixiyey* markaad ilmahaaga ku qorayso kiindaha (kindergarten) bilawga sanada kiindaha.

Kiinduhu wuxuu ka heli doonaa lacagta kabista Wasaarada Waxbarashada iyo Horumarinta Ilmanimada hore iyaga oo magacaaga ku hadlaya. (Lacagta toos ayaa loogu shubayaa kiindaha, sidaas darteed ilmahaagu wuxuu ku hellayaa bilaash ayuu ku hellayaa ama qiime aad hoos loogu dhigay.

Lacagta la dhimay waxaad u dalbi kartaa kiindaha waqti kasta inta sanada lagu jiro, xataa haddii ilmahaagu u wareego kiinda kale. Kabista si buuxda ayaa loo bixin doonaa teeramka oo dhan, iyada oo aan ku xirnayn waqtiga ilmahaagu bilaabay teeramka.

Dukumintiga* la ansixiyey waa warqad ka socota Wasaarada Socdaalka iyo Dhalashada ama Dukuminti loogu safro Australia 'foom sheegaya nooca fiisada'.

Sidee kiindaha kharajkiisa lagu bixiyaa?

Dawlada Fiktooriya waxay kharaj ku bixsaa adeegya badan si loo bixiyo barnaamijka carruurta ee kiindaha. Kharajbixintaani waxay door ka qaadataa barnaamijka kiindaha. Adeegaaga kiinduhu wuxuu masuul ka yahay xadadida heerka qiimaha.



Shahaadadani waxay muujisaa barnaamijka kiindaha loo dhigay waxaana bixiya barre aqoon leh oo ilmanimada hore waxaana kharajkiisa bixiya Dawlad Goboleedka.

Macluumaad intaas ka badan oo kabista lacagta kiindaha gal websaytka ah www.education.vic.gov.au/kindergarten/feesubsidy